



War-Saxaafadeed: Hadaladii Madaxweyne Xassan iyo Ra'iisal Wasaare Hamza.

Tixraac: PDF/02121

www.puntlanddiasporaforum.org

Taariikh: May 9, 2023

info@puntlanddiasporaforum.org

Waxay Gollaha Qurbajoogta Puntland – Puntland Diaspora Forum (PDF) ay cambaaraynayaan aadna uga xunyihiin hadaladii isdaba-jooga ahaa iyo weeraradii aan loo meel dayin ee maalmahaan ka soo yeerayay Madaxweyne Xassan iyo Ra'iisal Wasaarihiisa Xamza.

Waa ayaan daro inteeda le'eg ah in Madaxweyne Xassan Sheekh oo halku-dhagiisii doorasho ahaa “Soomaali Heshiis ah”, lagana sugayay inuu fursada labaad ee uu helay u adeegsado sidii uu ummada Soomaaliyeed u midayn lahaa, aad moodid in beryahan shaqadiisii isku bedeshay inuu deegaamo gaar aha Masaajida uga soo Qunuudo, halka Ra'iisal Wasaarihiisuna uu weeraro aan loo meel dayin oo munaasabado aan laaqi u ahayna ka weeraro Puntland.

Waxaa kale oo wax aad looga xumaado ah in Ra'iisal Wasaare Hamza oo aad moodid nin hadalo loosoo dhiibay ku hadaaqayay uu weerar qaawan ku qaaday Shacabka xaq-u-dirirka ah ee reer Laascaanood, kuwaas oo iska difaacaya maamulka Soomaali-diidkaa ee Hargaisa ee xasuuqa ba'an u gaystay welina ku haya shacabkaas Soomaaliyeed ee xalaashaa. Shacabka reer SSC waxay u dhimanayaan difaaca calanka iyo ciida Soomaaliyeed, sidaa awgeed, waxaa wax laga xumaado ah in dowladii ay ahayd inay calanka, ciida iyo midnimada Soomaaliyeed difaacdo, ay shacabkii u istaagay difaaca dalka ku tilmaanto kuwo tola'ayeey iyo dagaal qabiil ku jira.

Fashilka ku yimid dowladda Xassan iyo Hamza ee ah in Beesha Caalamku waxba ku aamini waydo, mashariicdii socotayna istaagto, waa mid ka yimid caalamka oo arkay maamul-xumada, musuq-maasuqa, eexda iyo qorshe-xumada dowladan, sidaa awgeed, waa ayaan daro in intii ay khaladaadkooda sixi lahaayeen, ay rabaan inay dadka Soomaaliyeed ku ridaan indho-sarcaad, kana dhaadhacshaan in Puntland ay sabab u yahay fashilkan.

Madaxweyne Hassan iyo Ra'iisal Wasaarihiisa waxaan uga digaynaa inay ka waantoobaan hadalada xanafta leh ee waxay sii kala fogeeyaan maahee aan ummadda Soomaaliyeed isku soo dhawaynayn, farahana kala baxaan arrimaha daakhiliga ee Puntland. Sidoo kalena, hadaad difaacii midnimadii Soomaaliyeed ku fashilmateen kana baqdeen inaad Somaliland runta u sheegtaan, inaad shacabka naftooda, sharaftooda, maatadooda, ciidooda iyo calankooda difaacaya ka daysaan aflagaadada iyo hagaradamada.

Puntland way ka kortay meel horgalayaal Villa Wardhiigley laga soo diray loo adeegsado khal-khal gelinta amniga iyo midnimada deegaamadasi, ururro Siyaasadeed iyo doorasho qof iyo cod ayayna u hayaantay, cidii isku dayda inay fashilisana waa cid duulaan ku ah rabitaanka shacabka Puntland.

Puntland Diaspora Forum (PDF) – Media and Government Relations Committee